


Dib-u-dhaqangali


Alaabta dib loo dhaqangaliyo waa la ururiyaa ka dibna waxa la geeyaa warshad halkaaso lagu isticmaalo oo laga sameeyo alaab cusub. Marmarka qaarkood waxa loo isticmaalaa in isla shaygii laga sameeyo. Daasadaha aluuminiumka ah waxa loo isticmaalaa in laga sameeyo daasado aluuminium ah oo cusub. Marka 16 daasadood oo aluuminium ah dib loo dhaqangaliyo waxa la badbaadinayaa hal galaan oo baatroot ah.



Marmarka qaarkood alaabta dib loo dhaqangaliyay waxa loo isticmaalaa in laga sameeyo alaab nooc kale ah. Dhalooyinka soodhaha ee balaastiga ah dib ayaa loo dhaqangaliyaa si looga sameeyo dunta loo isticmaalo sameynta dharka iyo qadiifadaha.



Dib-u-dhaqangalintu waxay dadka intooba badan u jirta inta uu jidku u jiro. Waxa jira waxyaabo badan oo dib loo dhaqangalin karo. Badi daasadaha, dhalooyinka quraaradda ah iyo jalxadaha ama ashuunada, wargeysyada iyo kaartoonada dib ayaa loo dhaqangalin karaa. Waxa kale oo aad dib u dhaqangalinka kartaa dhalooyinka balaastigga ah ee lambar #1 iyo #2 iyo jalxadaha ama ashuunada leh qoor. Dhalooyinka balaastigga ah ee leh lambaro kale, ama dhalooyinka aan lahayn qoor wakhtigan dib loogama dhaqangalin karo degmadaada. Lambarka waxa loo isticmaalaa si loo garto nooca balaastigga. Eeg lambarada #1 ama #2 ee ku yaala xagga hoose ee dhalada ka dibna dib u dhaqangali.



Haddii aad ku nooshahay guri jidkiisa laga ururiyo alaabta, waxa aad alaabta dib loo dhaqangalinayo ku ridi kartaa haan dib-u-dhaqangalin ama weel kale oo loogu talagalay, ka dibna waxa aad jidka dhigi kartaa maalinta dib-u-dhaqangalinta.



Haddii aad ku nooshahay abaarman, badanaa haamaha dib-u-dhaqangalintu waxay ku yaalaan halka hoose ee dhismaha ama dibadda oo ah meel u dhow weelka qashinka. Ku rid alaabtaada dib-u-dhaqangalinta haamaha. Haddii aanaydun lahayn haamo dib-u-dhaqangalin, waxa la isticmaali karaa bac ama sanduuq adag. Sharciga Minnesota waxa uu leeyahay waa in dhamaan abaarmanadu leeyihiin meel dib-u-dhaqangalinta loogu talagalay oo ay isticmaali karaan deganeyaashu.



Dhamaan alaabta dib-u-dhaqangalinta lagama qaadi karo jidka. Alaabta qaarkood, sida macdanta la tuuray, waxa laga yaabaa in loo baahan yahay in la geeyo xarun dib-u-dhaqangalin oo ku taala xaafaddaada.



Alaab badan, sida qalabka guriga iyo telefshanada laguma tuuri karo qashinka waxana la rabaa in la geeyo xarun qashin tuuris oo si sax ah u maamuli doonta.



Waxa aad weydiin kartaa magaaladaada si aad u ogaatid waxa aad jidka dhigi kartid iyo waxa la rabo in la geeyo xarun dib-u-dhaqangalin. Waxa kale oo aad tagi kartaa barta www.GreenGuardian.com si aad u ogaatid teleefonka aad wici kartid si aad u heshid warka dib-u-dhaqangalinta ee xaafaddaada. Sida ay sheegtay, GreenGuardian waxay dib-u-dhaqangalintu sannad walba ka badbaadisaa in lagu rido dhulka qashin buuxista tiro ka badan hal malyan oo tan oo ah qashin.



Waxa kale oo aad iibsana kartaa waxyaabo ka sameysan alaab dib loo dhaqangaliyay. U fiirso astaanta dib-u-dhaqangalinta ee ku taala qoraalka shayga, ama ereyada “made from recycled material” oo ah “waxa laga sameeyay alaab dib loo dhaqangaliyay” ama “contains recycled content” oo ah “waxa ku jira alaab dib loo dhaqangaliyay”.

